

TALOOYINKA KA GUDBIDA DUGSIGA CAADIGA AH

| | | |
|--|---|---|
| <p>Booqo dugsiga cusub si aad u xaqijiso in ilmahaagu fahamsan yahay. Faham sida lagu tago iyo sida lagaga yimaado dugsiga.</p> | <p>Haddii aad qorshaysay inaad soo qaado ilmahaaga dugsiga ka dib, isku raaca meesha iyo waqtiga. Dugsiyada qaarkood ayaa bixiya daryeelka dugsiga ka hor iyo ka dib.</p> | <p>Imaw fadhiyada maclumaadka kuna dhiirigeli ilmahaaga in uu ka qaybgalo xarakaadka maclumaad bixinta.</p> |
| <p>Hubi in dugsigu leeyahay Caawiyaha Aqooneed iyo Dhaqamada badan [Multicultural Educational Aide (MEA)] kaas oo ku hadli kara luqadaada.</p> | <p>Kala hadal dugsigaaga inaad hesho adeega afcelinta oo lacag la'aana haddii loo baahan yahay. Adeegaas waa la helli karaa arrimaha qaarkood.</p> | <p>Sii dugsiga faahfaahinta meelaha lagaala soo xiriirayo si laguula soo xiriiro haddii loo baahan yahay. Baro dugsiga namabrka lagala xiriirayo.</p> |
| <p>Hel koobiga jadwalka si aad u ogaato xiisadaha ilmahaagu leeyahay. U sheeg dugsiga haddii ilmahaagu maqnaanayo ama soo daahayo.</p> | <p>U sheeg dugsigaaga haddii ilmahaagu qabo dhibaato caafimaad ama baahiya gaara. La hadal dugsiga haddii aad qabto wax welwel ah.</p> | <p>Ka hor intaan dugsigu bilaaban, gad ilmahaaga lebiskiisa dugsiga. Dugsiyada qaarkood ayaa gada lebis hore.</p> |
| <p>Soo gad buugta loo baahan yahay iyo agabka – weydii dugsiga liiska iyo sida loo dalbado.</p> | <p>Ku qor ilmahaaga magaciisa dhamaan alaabtiisa sida dharka iyo qalabkiisa.</p> | <p>Waxaa laga yaabaa in dugsigu u baahan yahay in ardadu haysato laptop ama iPad. Weydii dugsiga nooca ilmahaagu u baahan doono.</p> |
| <p>U diyaari cunto wanaagsan. Hubi haddii iskuulku leeyahay meel wax laga cuno.</p> | <p>Ku dhiirigeli ilmahaagu inuu ka mid noqdo kooxda shaqada-guriga (homework) ama hawlaho kale oo dugsiga dibadiisa lagu qabanayo.</p> | <p>Haddii loo baahan yahay kaalmo dhaqaale, la xiriir dugsiga ilmahaaga wixii kaalmo dhaqaale ah si wax looga qabto kharajyada dugsiga.</p> |

Maclumaad intaas ka badan gal websaytka www.education.vic.gov.au/parents/going-to-school